# Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
# Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta
# Barnaamijka Kaabayaasha Waddooyinka Soomaaliya (RIPS)

## GUNAANADKA QORSHAHA DIB-U-DEJINTA (RAP)

## Mashruuca: Dayactirka Waddada Beledweyne–Kalabeyr (22 km)

## Gobolka Hiiraan, Soomaaliya

**Waxaa diyaariyay:**
**Unugga Isku-duwidda Mashruuca (PCU)**
**Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta**
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Taariikhda: 15 Abriil 2025**

**Ogeysiis:**
Dukumentigan waxaa loo diyaariyey si waafaqsan xeerarka iyo siyaasadaha qaran ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo siyaasadaha ilaalinta deegaanka iyo bulshada ee Bangiga Horumarinta Afrika. Wasaaradda waxay si rasmi ah u oggolaatay Bangiga Horumarinta Afrika inuu daabaco warbixintan, oo ay ku jirto nooca lagu turjumay afka Soomaaliga, laguna baahiyo baraha rasmiga ah ee bangiga.

# GUNAANADKA QORSHAHA DIB-U-DEJINTA (RAP)

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), iyada oo u sii maraysa Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska, iyo Guryeynta (MPWR&H), ayay hirgelinaysaa Barnaamijka Kaabayaasha Waddooyinka (Road Infrastructure Program Somalia (RIPS) oo ay si wadajir ah u maalgelinayaan Soomaaliya, Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) iyo European Union (EU). Barnaamijkan wuxuu ujeedkiisu yahay dib-u-dhiska marinnada muhiimka ah ee waddooyinka ee dalka si loo horumariyo isku xirka waddooyinka gaadiidka, maareynta kaabayaasha dhaqallaha dalkka, iyo awoodda hay'adaha horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha dalka. Ujeedada guud ee RIPS waa kor u qaadidda koboca dhaqaale ee Soomaaliya iyada oo la heli karo adeegyo gaadiid oo la isku halayn karo, jaban, lana heli karo si loo fududeeyo helitaanka adeegyada, isku socodka dadka iyo badeecadaha, loogana qaybqaato horumarinta iyo xasilloonida bulshada iyo dhaqaalaha dalka.

## Guudmar iyo Hawlaha Mashruuca

RIPS ayaa diiradda saaraya dib-u-dhiska Waddada Beledweyne-Kalabeyr, oo ah qayb dhererkeedu yahay 22 km kana mid ah 391 km ee Waddada Beledweyne-Gaalkacyo, waana qayb muhiim ah oo ka tirsan Marinka isku xirka Waqooyi-Koonfur (NS) ee Soomaaliya. Marinkani wuxuu isku xiraa magaalooyinka Muqdisho, Jowhar, Beledweyne iyo Gaalkacyo, wuxuuna kaloo yahay isku-xir muhiim u ah Itoobiya iyo Soomaaliya. Waddada Beledweyne-Kalabeyr, oo ka bilaabata deegaanka Jente Kundishe (oo 5.63 km u jirta magaalada Beledweyne), oo dad yar ku nool yihiin oo uu ka dhacay barakac sababo la xiriira amni-darro. Inkasta oo ciidamada ammaanku ay Jente Kundishe ka saareen dadkii deggenaa sannadkii 2021 iyo sidoo kale dhowr toddobaad ka hor, haddana mashruucu wuxuu magdhow siin doonaa milkiilayaasha Dabakaayo (kiosk)-yada ee hore loogu aqoonsaday inay yihiin dadkii uu mashruucu saameeyey (Project-Affected Persons, PAPs), maadaama ay sharci-darro ku degganaayeen dhulka wadada loogu talagalay.

## Ujeeddooyinka iyo Hab-raaca Qorshaha Dib-u-dejinta (RAP)

Hirgelinta mashruuca kor lagu xusay ee lagu dhisaayo waddada waxay meelaha qaar u baahan doontaa in la helo dhul cusub oo jidka la marsiiyo si mashruucu u hirgalo. Sidaa darteed, helitaanka dhulkan cusub wuxuu keeni karaa barakac  dadka qaar oo guuritaanka ama barakac dhaqaale (lumista dhul-beereed, hantida ama helitaanka hantida, lumista dalag, iyo xaddidaad ku timaadda isticmaalka dhulka) keeni kara, kuwaas oo dhammaantood keeni kara hoos u dhac ku yimaadda

dakhli ama ilo nololeed — ama labadaba. Sidaas awgeed, Qorshahan Dib-u-dejinta (RAP) ayaa loo diyaariyay si uu u hago arrimaha la xiriira barakaca ee mashruuca.

RAP-kan wuxuu dejinayaa habraac mideysan oo ku saabsan sida loo maareynayo helitaanka dhulka iyo xeerarka marin-u-helidda, iyo sidoo kale dib-u-habaynta hab nololeedka dadka uu mashruucu saameynayo (PAPs).

Ujeeddada guud ee Qorshaha Dib-u-dejinta (RAP) waa in la bixiyo hagitaan ku saabsan bixinta magdhow iyo dib-u-soo celinta nolosha dadka la aqoonsaday in uu mashruucu saameynayo.

Qorshaha RAP ee waddada Beledweyne–Kalabeyr wuxuu la jaanqaadayaa **Nidaamka Isku-dhafan ee Badbaadinta (ISS) ee AfDB** 2023, kaas oo ka kooban **toban Xeerar Badbaadin Deegaanka iyo Bulshada (E&S OSs)**. Xeerarka muhiimka ah ee mashruucan si toos ah u taabanaya waxaa ka mid ah:

- **OS 1**: Qiimaynta iyo Maareynta Khatarta iyo Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.
- **OS 5**: Helitaanka Dhul, Xaddidaadda Isticmaalka Dhulka, iyo Dib-u-dejin Aan ikhtiyaar ahayn.
- **OS 7**: Dadka Nugul.
- **OS 10**: La-tashiga Daneeyayaasha iyo Shaacinta Macluumaadka.

Qorshaha RAP waxaa lagu diyaariyay iyada oo la marayo:

- **U kuurgelidda Dukumeentiyada**: Warbixintaan waxaa lagu qoran naqshadaha mashruuca waxaadna ku xusan sharciyada Dastuurka Soomaaliya, iyo Nidaamka Bulsho Badbaadinta ee AfDB.
- **La-tashiyo Dadweyne**: Waxaa latashiyo lala yeeshay dadka uu mashruucu saameynayo (PAPs) iyo bulshada deegaanka si loogu sharaxo ujeeddada mashruuca, loona ururiyo afkaarta bulshada, loona faahfaahiyo geeddi-socodka RAP.
- **Doodo Koox-kooxeed iyo Wareysiyo**: Waxaa lagu ururiyay xog tayo leh iyo mid tiro ahaan ah si loo fahmo xaaladaha bulsho-dhaqaale iyo saameynta mashruuca.
- **Tirakoob iyo Qiimayn Hantiyeed**: Waxaa la tirakoobay dadka mashruuvcu saameyneyso iyo sidoo kale la qiimeeyay khasaaraha si loo go'aamiyo magdhowgooda si cadaalad ah.

RAP-ku wuxuu caddeynayaa in mashruucu loo fuliyo si **cadaalad ah, daah-furan, iyo si loo dhan yahay**, taasoo yareyneysa saameynta taban ee ku timaadda bulshooyinka mashruuc saameynayo.

## Saameynta Dib-u-dejinta ee Mashruuca

Dib-u-dhiska waddada Beledweyne–Kalabeyr waxay keeni doontaa barakac dhaqaale oo saameyn doona 20 qoys . Inkasta oo barakaca uu aad u yaryahay sababo la xiriira jiritaanka xadka waddada ee horey u jiray, haddana mashruucu wuxuu dammaanad qaadayaa in dhammaan labaatanka qof ee la aqoonsaday ay helaan magdhow cadaalad ah iyo taageero buuxda.

## Tirakoobka Bulsho-Dhaqaale

Tirakoob lagu sameeyay deegaannada Jente Kundishe iyo Eel Gaal ayaa lagu aqoonsaday 20 qoys oo uu mashruucu saameyn doono (14 qoys oo ku sugan Jente Kundishe iyo 6 qoys oo ku sugan Eel Gaal). Waxaa ku jira know-iyo-toban (11) haween ah iyo seddax (3) rag ah oo ku nool Jente Kundishe, iyo Afar (4) haween ah iyo laba (2) rag ah oo ku sugan Eel Gaal. Waxaa sidoo kale la aqoonsaday laba qof oo leh baahiyo gaar ah (dad naafo ah). Taariikhda go'an ee xaq u lahaanshaha magdhowga ayaa la dejiyay 31 December 2021, taasoo dammaanad qaadaysa in dadka keliya ee la aqoonsaday taariikhdaas ka hor ay xaq u leeyihiin magdhow.

## La-tashiyada Bulshada iyo Ka-qaybgalka

Qodobka 10aad ee Xeerarka Hawlgalka Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) – *La-tashiga Daneeyayaasha iyo Shaacinta Macluumaadka* (OS10) – wuxuu adkeynayaa in deeq-bixiyuhu uu hirgeliyo geeddi-socod la-tashi macno leh oo siiya daneeyayaasha fursad ay ku cabbiraan aragtidooda la xiriirta khataraha mashruuca, saameyntiisa, iyo tallaabooyinka looga hortagayo, islamarkaana looga jawaabo cabashooyinkooda.

La-tashiyo ballaaran ayaa lala yeeshay daneeyayaasha sanadkii 2021 iyo bishii Febraayo 2025, si loo bixiyo xog faahfaahsan oo ku saabsan mashruuca, saameyntiisa, iyo geeddi-socodka RAP-ka. La-tashiyadan waxay xaqiijiyeen in daneeyayaashu ay si fiican u fahmaan mashruuca isla markaana ay si firfircoon uga qaybqaataan go'aamada la xiriira, taasoo kor u dhacday daahfurnaanta iyo ka-qaybgalka bulshada.

## Soo Koobid: Aragtiyaha Bulshada / Walwalka iyo Jawaabaha La Bixiyay

| SN | Aragtiyaha, Walwalka, iyo Talooyinka | Jawaabaha La Bixiyay |
|---|---|---|

| | | |
|---|---|---|
| 1 | Bulshada waxaa lala tashaday 2021-kii arrinta ku saabsan dhismaha waddada, balse mashruucu weli ma bilaaban xilligaas. Waxay isweydiiyeen in waddadu dhab ahaantii la dhisi doono. | Raalli-gelin ayaa la bixiyay dib-u-dhaca, sababtuna waxay ahayd dhaqaale la'aan. Waxaa la xaqiijiyay in maalgelintu dhowaan la heli doono, mashruucuna uu bilaaban doono. |
| 2 | Waxaa laga muujiyay walaac ah in laga yaabo in lagu sirayo arrinta magdhowga iyadoo dadka si sharci-darro ah u deggen waddada loo sheegayo in la magdhow la siinayo. | Waxaa la caddeeyay in Barnaamijka Isdhexgalka Gobollada ee (RIPS) qeyb ka yhay uu yahay mashruuc uu maalgelinayaan EU iyo AfDB, oo xeerinaya in dadka mashruucu saameynayo dhammaantood la siiyo magdhow, iyadoon loo eegin xaaladdooda sharci. |
| 3 | Bulshadu waxay rabtay faahfaahin ku saabsan magdhowga iyo taageerada la heli doono. | Waxaa la ogeysiiyay in magdhowgu ku salaysnaan doono qiimaha beddelka ah ee hantida luntay, iyadoo sidoo kale la siin doono taageero dheeraad ah oo lagu fududeynayo kala guurka iyo dib-u-dejinta. |
| 4 | Waxaa la codsaday jiritaanka fursado shaqo inta lagu jiro fulinta mashruuca. | Kooxda mashruuca waxay ballanqaadeen in ay raadin doonaan meelaha ay xubnaha bulshada deegaanka ka heli karaan fursado shaqo intii lagu jiro dhismaha wadada. |
| 5 | Waxaa laga walaacay awoodda dowladda ee bixinta magdhowga, maadaama ay jirto xaddidaad dhaqaale. | Waxaa la caddeeyay in mashruuca uu maalgelinayaan EU iyo AfDB, iyadoo lacagaha magdhowguna ay qeyb ka yihiin qarashka dowladda la siiyay. |
| 6 | Ganacsatada waxay weydiiyeen in la oggolaan doono in ay ku noqdaan goobahoodii hore marka dhismaha la dhameeyo. | Waxaa la xaqiijiyay in la dhisi doono laba suuq, isla markaana ay heli doonaan meel la dajiyo marka la dhammeeyo. |

## U-Xaqlahaanta/qalmitaanka iyo Xuquuqda Magdhowga

Dadka ay mashruucu saameynayo (PAPs) waxay xaq u yeelan doonaan magdhow ama xuquuqo kale oo lagu saleeyay heerka deganaanshahooda ee dhulka la saameeyay. Xuquuqaha la xiriira dib-

u-dejinta waxaa lagu qeexay **Shaxda(Matrix)-ka Xuquuqda**, kaas oo la jaanqaadaya shuruucda iyo dhaqanka ka jira Soomaaliya, isla markaana u hoggaansamaya yoolalka Xeerarka Badbaadinta Deegaanka iyo Bulshada ee AfDB (ISS OS).

Dhammaan PAPs-ka lagu diiwaan geliyay **ka hor taariikhda go'an** ("cut-off-date") waxay xaq u leeyihiin magdhow. Xaq-u-lahaanta/U-qalmitaanka magdhowgu wuxuu ku xiran yahay **taariikhda go'an**, taasoo lagu heshiiyay intii lagu jiray la-tashiyada daneeyayaasha. Wixii horumarin ah ama dhismo ah oo la saameeyay kadib taariikhdaas lama siin doono magdhow.

PAPs-ka waxaa si cad loogu wargeliyay xuquuqdooda iyo ikhtiyaarradooda magdhow, waxaana loo bandhigay qadarka magdhowga lacageed si ay u eegaan una oggolaadaan. **Jente Kundishe**: Wadarta lacagta magdhowgu waa **USD 14,880**, oo kala ah: **USD 9,720** oo ah magdhow dakhli **USD 5,160** oo ah magdhow dhismo. **Eel Gaal**: Wadarta lacagta magdhowgu waa **USD 10,080**, oo kala ah: **USD 1,980** oo ah magdhow dakhli **USD 8,100** oo ah magdhow dhismo. Ganacsi kasta wuxuu heli doonaa **USD 20** oo ah kharashka guuritaanka. Dadka naafada ah (PWDs) waxay heli doonaan **USD 100** midkiiba oo ah taageero dheeraad ah.

## Hanaanka Xallinta Cabashooyinka (GRM)

Hanaanka Xallinta Cabashooyinka (GRM) wuxuu qeexayaa waddada ay dadka mashruucu saameeyay (PAPs) raaci karaan si ay u gudbiyaan cabashooyinkooda la xiriira qaadashada dhulka iyo bixinta magdhowga, iyadoo si faahfaahsan loo sharaxayo heerarka iyo habraacyada lagu xallinayo cabashooyinka.

PAPs waxay cabashooyinkooda ku gudbin karaan warqad, telefoon, farriin qoraal ah, email ama si toos ah.

Qodobka 10aad ee Xeerarka Hawlgalka Deegaanka iyo Bulshada (OS10) ee Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) wuxuu adkeynayaa in hanaanka xallinta cabashooyinka uu noqdo mid lagu xalliyo arrimaha si degdeg ah, wax-ku-ool ah, daah-furan, dhaqan ahaan ku habboon, si fududna loo heli karaan dhammaan dadka ay mashruucu saameeyay, iyada oo aanay bixin wax kharash, una keeni karin cawaaqib xumo.

Waxaa la dhisay **Hanaanka Xallinta Cabashooyinka ee shan heer leh**, si wax looga qabto cabashooyinka la xiriira mashruuca, oo ay ku jiraan kuwa ka dhasha RAP. **Guddiga Xallinta Cabashooyinka (GRC)** wuxuu ka kooban yahay wakiillo ka socda maamulka deegaanka, odayaasha dhaqanka, culimada, kooxaha haweenka, iyo kooxaha dhalinyarada.

Hannaankani wuxuu dammaanad qaadaya in cabashooyinka si degdeg ah, cadaalad ah, loona maro heerar cad loo xalliyo:

1. **Heerka Tuulada**: GRC wuxuu ku xallinayaa cabashada heer deegaanka.
2. **Wasaaradda Howlaha Guud ee Hirshabelle**: Cabashooyinka aan lagu xallin heerka tuulada waxaa loo gudbiyaa heerkan.
3. **Wasaaradda Howlaha Guud ee Federaalka**: Haddii loo baahdo, cabashooyinka waxaa la sii gaarsiiyaa heerka federaalka.
4. **Bangiga Horumarinta Afrika**: Haddii aan xal laga gaarin heerarka hore, waxaa la gaarsiiyaa AfDB.
5. **Maxkamadaha**: Waxaa loo gudbi karaa hab sharci ah haddii xal rasmi ah aan la gaarin.

## Qaab-dhismeedka Hirgelinta RAP

Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta ee Federaalka, iyada oo u sii maraysa Unugga Isku-duwidda Mashruuca (PCU), ayaa mas'uul ka ah hirgelinta Qorshaha Dib-u-dejinta (RAP). Guddiga Xallinta Cabashooyinka (GRC) wuxuu si firfircoon uga qayb qaadanayaa hirgelinta, iyadoo la kaashanayo xafiisyada maamulka deegaanka.

Hawlaha dhismaha ee mashruuca waxaa la bilaabi doonaa **kaliya marka dhammaan dadka ay mashruucu saameeyay ay helaan magdhow buuxa**, si loo xaqiijiyo in aysan dhicin barakac iyada oo aan magdhow horay loo bixin.

## Kormeerka iyo Qiimeynta (Monitoring & Evaluation - M&E)

Mid ka mid ah yoolalka ugu muhiimsan ee Xeerka OS5 ee Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) waa in la dhiso hannaan lagu kormeero waxqabadka iyo waxtarka hawlaha dib-u-dejinta aan ikhtiyaariga ahayn ee ka dhasha howlaha mashruuca, isla markaana lagu daweeyo dhibaatooyinka marka ay soo baxaan.

Dhammaan qarashaadka la xiriira kormeerka iyo qiimeynta (M&E) waxay qeyb ka yihiin miisaaniyadda guud ee hirgelinta RAP, sida lagu caddeeyay miisaaniyadda mashruuca.

Qaab-dhismeed ballaaran oo kormeer iyo qiimeyn ah ayaa la dhisay si loo hubiyo in Qorshaha Dib-u-dejinta (RAP) si hufan loo hirgeliyo. Qaabkan waxaa ka mid ah:

- **Kormeer Gudaha (Internal Monitoring)**: Waxaa fuliya Wasaaradda Howlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta ee Federaalka si loo dabagalo horumarka iyo u hoggaansanaanta qorshaha.
- **Kormeer Dibadda (External Monitoring)**: Hay'ado madax-bannaan ayaa xaqiijin doona natiijooyinka kormeerka gudaha iyo qiimeynta saameynta bulsho-dhaqaale.

- **Sahan Hore iyo Dabagal (Baseline and Follow-Up Surveys)**: Waxaa lagu cabbiri doonaa isbeddelka ku yimid hab nololeedka iyo dakhliyada dadka ay mashruucu saameeyey (PAPs).
- **Ra'yi-celinta Daneeyayaasha (Stakeholder Feedback)**: Waxaa la joogteyn doonaa wadahadallada lala yeesho PAPs iyo daneeyayaasha kale si loo xalliyo cabashooyinka loona hagaajiyo habka fulinta.
- **Hanti-dhawrka Dhameystiran (Completion Audit)**: Hanti-dhawr dibadeed ayaa lagu sameyn doonaa si loo qiimeeyo in ujeeddooyinka RAP la gaaray, loona xaqiijiyo in noloshii PAPs dib loo soo celiyay ama si ka wanaagsan loo hagaajiyay.

## Gabagabo iyo Talooyin

Qorshaha Dib-u-dejinta (RAP) ee mashruuca waddada Beledweyne–Kalabeyr wuxuu bixiyaa qaab-dhismeed xooggan oo lagu maareynayo dib-u-dejinta iyo bixinta magdhowga, isagoo dammaanad qaadaya in dadka uu mashruucu saameeyo (PAPs) aysan noqon kuwo xaaladdoodu kasii darto sababo la xiriira mashruuca.

**Talooyinka ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:**

- **Ka-qaybgelinta Hoggaanka Deegaanka**: In maamulka beelaha iyo masuuliyiinta deegaanka lagu daro geeddi-socodka si loo kasbado kalsoonida bulshada loogana hortago khilaafaadka.
- **Ixtiraamka Lahaanshaha Dhulka Dhaqameed**: In hogaamiyeyaasha dhaqanka lagu daro go'aamada la xiriira dhulka.
- **Qiimeyn Cadaalad ah oo Hantiyeed**: In la isticmaalo hab-raacyo ku saleysan qiimaha suuqa iyo qiimaha beddelka si loo go'aamiyo magdhow sax ah.
- **Xoojinta Nidaamka Cabashada**: In la hubiyo in Guddiga Xallinta Cabashooyinka (GRC) uu noqdo mid la heli karo, daah-furan, wax ku ool ah.
- **Taageerada Kooxaha Nugul**: In la siiyo gargaar dheeraad ah qoysaska ay haweenku madaxda ka yihiin, dadka naafada ah (PWDs), iyo dadka kale ee nugul.

Iyadoo la raacayo shuruucda dalka Soomaaliya iyo hannaanka hagidda AfDB, mashruucu wuxuu isku dheellitirayaa ujeeddooyinka horumarineed iyo ilaalinta bulshada la saameynayo, si loo xaqiijiyo natiijooyin cadaalad ah oo waara.

RAP-kan ma ahan oo keliya mid wax ka qabanaya baahiyaha degdega ah ee dib-u-dejinta, balse wuxuu sidoo kale xoojinayaa awoodda Soomaaliya u leedahay maareynta mashaariicda horumarineed ee mustaqbalka si mas'uuliyadi ku dheehan tahay.